

Ilaalinta Luqadda kowaad/Guriga waxay keenaysaa asaas adage e barashada Ingiriisiga.

Luqadda kowaad oo guriga lagu barto waxay aad bay muhiim u tahay waxayna samaysaa asaaska horumarka luqadda ee dambe.



Carruurta waxay si fudud u helaan laba (ama wax ka badan) luqadood markay helaan fursado ay ku maqlaan ama kula hadlaan wax ka badan hal luqad.

Waalidiinta, xubnaha qoyska iyo barayaasha waa waxyaalaha ugu saamaynta badan horumarka iyo ilaalinta luqadda guriga. Waalidiintu waxay ku caawin karaa ayagoo si joogto ah u adeegsada luqadda gurigooda markay la hadlayaan carruurtooda ayagoon Ingiriisi soo qaadayn.

Waxaa jira sababao sababtaas ay muhiim ugu tahay ilaalinta luqadda kowaad ama guriga:

- Markii ay carruurta si fasiixa ugu hadlaan luqadda gurigooda taas waxay ka caawisaa inay bartaan luqad labaad.
- Ilaalinta luqadda guriga waxay muhiim u tahay si loo abuurro dareenka amniga, ku-xirnaata dhaqanka iyo qoyska iyo dareenka ka mid ahaanshaha.
- Si fiican u aqoonta wax hal luqad ka badan waxay kordhisaa dabacsanaanta fikradda carruurta waxayna saamayn habboon ku leedahay itijaahooda ku aadan waxbarashada, dhibaato xallinta iyo waxqabadka aqoonbeed.

Carruurta waxay u baahan yihiin inay maqlaan luqadda gurigooda, oo looga hadlayo xaalado kala duwan iyo ujeedooyinka kala duwan. Taas waxay ka caawisaa inay yeeshaan dareen xooggan ee qofnimadooda waxayna siisaa asaas adag ee barashada Ingiriisiga.





Ingiriisiga oo loo barto luqad dheeraad ah ahaan carruurnimada hore.

Carruurta waxay helaan fursado badan si ay Ingiriisiga u bartaan inta lagu jiro carruurnimada hore.

Carruurta si dhaqso ah ayey u dhgexgalaan beya'dda halkaas oo ay Ingiriisiga ku maqlaan duruufo badan oo kala duwan. Bareyaashu waxay naqshado wacan siiyaan iyo fursado badan carruurta si ay u maqlaan una tijaabiyaan Ingiriisiga. Bareyaashu way tilmaami doonaan kuna dhiirigelin doonaan marka ay tartatriibta u baranayaan inay fahmaan oo ku hadlaan Ingiriiska.

Carruurta waxay iskood u horumariyaan xirfadahooda luqadeed. Carruurta baranaysa labada luqadood isla hal mar, intii muddo ah, waxay ku hadlaan hal luqad in ka badan tan kale. Bilowga hore, carruurta way isku khaldaan luqadaha markay hadlayaan. Waxaa laga yaabaa inay erayga ku garanayaan luqadda oo aysan ku garanayn tan kale. Si ay u ilaaliyaan fasiixnimada hadalkooda waxay adeegsadaan erayo ay garanayaan.

Waxaa muhiim ah marka ay carruurta baranaysa Ingiriisiga oo u ah luqad dheeraad ah inay waalidiintu kula hadlaan carruurta luqadda guriga. Taas waxay taageeraysaa in ilmahoodu inuu horumariyo oo ilaaliyo luqadda guriga.



Information for families: Handout 1 - Somali

Macluumaadka loogu talagalay qoysaska: Qaybta 1aad